# Habka Maaraynta Guud
# ee ilaalinta iyo ka falcelinta
# ku xadgudubka Badqabka
# Ee ay la kulmaan inta la macaamisha IRC

**Ujeedada**
IRC waxay ku qeexdaa Badqabka inuu yahay ilaalinta, badbaadada iyo sharafta shaqaalaha iyo Macaamiisha. Marka Laga hadlayo mawduuca macaamiisha, waxaa ku jira waxaa ku jira dhiigmiirashada iyo ku xadgudubka dadka waawayn iyo caruurta, sida jir ahaan, hadal ahaan, dareen ahaan, maskax ahaan, dhaqaale ahaan iyo ku xad gudub galmo. ku xadgudubkaas ka imaan kara macaamiisha IRC - sida Shaqaaleheeda, qandaraaslayaasha, kuwo shaqo wadaaga ay yihiin, qan-daraaslayaasha hoose, shirkadaha ama kuwo sikale ula shaqeeya. Hab raacan maaraynta ah wuxuu si toos ah u qabanayaa kuwa iyagu ah ama noqon kara macaamiil IRC ama ha ahaadeen dad waawayn ama kuwo yaryar.

Habraacan maaraynta ah waxaa loo soo saaray si loo hubiyo in xafiisyada IRC ay tallaabada ugu dhakhsaha badan ee ku haboon marka lagu xadgudbo shuruucda bad qabka. Waxay taageeraysaa xafiisyada maxaliga ah - labadaba RAI iyo CRRD- si loo hubiyo in ay dagsanyihiin ayna jiraan habraacyo lajaan qaadi kara deegaan shaqeedka ka hor inta aysan dhicin dhacdo iyo inay ka taageerto xafiisyadaas ka hortaga in dhacdooyin noocaas ah dhacaan.

Dhamaan Xafiisyada IRC waa in ay isticmaalaan Habraacan maaraynta si ay uga soo saaraan nidaamyo ay ku hawlgali karaan oo la jaanqaadi kara deegaamadooda shaqo iyada oo lagu qorayo luuqad ay fahmi karaan shaqaalahoodu[1] Qoraalkan waxa oo dajinayaa nidaamka ugu xadidan ee lagaga hortagi karo lagagana falcelin karo ku xadgudubka shuruucda badqabka isaga oo u dhigaya hab la jaanqaadi kara mabaadii'da iyo siyaasadaha IRC iyada oo la isku dayayo inay noqdaan kuwo cadaalada iyo bad-baadada qayb ka ah. Sida loo fulinayo waxa uu noqon karaa mid kala duwan iyada oo ay ku xirnaanayso shuruuc deegaameedka meeshaas ka jira iyo taageerada laga heli karo meesha laga shaqaynayo

> Qoraalka wuxuu si isku mid ah u qabanayaa RAI iyo CRRD Inkasta oo RAI meelaha ay ka hawlgasho ay ku tiirsantahay nidaam la hormariyay oo lajaanqaadi kara deegaankaas, hadana xafiisyadan waa ay hubiyaan habraacyada warbixinta iyo falcelintuba ay yihiin kuwo cad cad iyo in uu dagsanyahay nidaam ka hortag oo adag.

Habkan maaraynta wuxuu qabanayaa dhamaan dadka waawayn iyo caruurta kuwaas oo kala kulmay xad gudub iyo dhiigmiirasho shaqaalaha IRC Hadii ay jirto Waxyaalo ama ficillo si gooni ah caruurta u quseeya waxaa lagu muujin doonaa Santuukh (Laydi) inta qoraalka lagu jiro Hadii aan si gooni ah loo xusin tallaabooyinka iyo ficilladu waxay ahaanayaan isku mid caruurta iyo dadka waawayn

Marka ay IRC tahay hogaanka shaqada ama qolada ay shaqa wadaaga yihiin aysan lahayn nidamkii iyo habraacyadii la rabay, IRC waxa ay la wadaagaysaa habka maaraynta iyo nidaamka Hawlgalka ee degamaysan qolada ay shaqa wadaaga yihiin, taas oo qolada shaqa wadaaga la yahay oo soo hoos galayso habraaca badqabka IRC ilaa inta qolada kale ay ka samaysanayaan mid iyaga gooni u ah.

Habkan Maaraynta waxaa ku jira qaybahan soo socda:

I. Ka hortaga iyo u diyaar garowga
   i. Wada xiriirka
   ii. Tababarka

---

1 Shax qoraaleedka heerka nidaamyada howlgalka waxaa laga heli karaahttps://rescue.box.com/s/9xujls8skyqjrhe9jkcoq3xah9obj8jz

II. Warbixinta
III. Fakashada Xogta iyo Habka baarista
IV. Falcelinta iyo Taagarada
V. Barashada iyo ku dhaqanka

**Ka hortagida iyo Diyaar garowga**

Ka warqabka iyo fahamsanaanta jiritaanka iyo waxa uu ka koobanyahay Habka maarayntu iyo Nidaamka hawlgalka deegaamaysan ama qoraalo kale oo loo sameeyay badqabka macaamiishu waxaa muhiim uyihiin ka hortaga in lagu xadgudbo nidaamka badqabka. IRC waxa ay ka filaysaa dhamaan hogaanka xafiisyada in ay fariin ugu diraan shaqaalahooda dhamaan waxa laga ogolyahay iyo waxa aan la ogolayn, sidoo kale inay udiraan tallaaboyinka loo baahanyahay in laqaado marka lagu xad gudbo nidaamka badqabka IRC[2] Waxaa kale oo au suurtagalinaysaa diyaargarowga si loo helo wakhti iyo falcelin ku haboon oo looga jawaabo marka ay dhacdo dhacdo.

<u>Wada xiriirka</u>

Wada xiriirka iyo isfahamku waa inaan dajino habka shaqaalaha aan rabno, sida gunno qaatayaal, marmar. qandaraasle ama joornaatoole, is xilqaame, shaqo wadaag, shirkad, kuwo sikale inoola shaqeeya iyo macaamiil aan tixgalinno. Waa in aynu qeexno waxa la inaka rajaynayo iyo xuduudaha inoo dhaxaynaya una qeexno si cad kooban lana fahmi karo; waxa ay qeexaysaa dabeecadaha la aqbali karo iyo kuwo aan la aqbali karin. Isticmaal Nidaamka xadidan si aad xafiiskaga ugu hagto si cadna ugu fahamto marka laga hadlayo waxa uu yahay nidaamka badqabka IRC:

- Abuur Hogaanka badqabka ee meesha aad joogto
  - Ma aha macneheedu inuu noqdo shaqaale farsamo lakin waa inuu noqdaa qofka ugu haboon inuu booskaas qabto. Shaqadan Hogaamintu waa in ay taageerto isku soo ururinta shaqooyinka la xiriira badqabka sida diyaarinta Nidaamka hawlgalinta deegaamaysan (SOP) si looga falceliyo ku xadgudubka badqabka kaas oo lid ku ah macaamiisha. Lifaaqa 1 waxa uu na tusayaa TOR ka lasoo jeediyay ee shaqadan hogaaminta
  - Hubi in ugu yaraan mid ka mid ah hogaanka ay tahay dumar, taas oo ka qayb qaadanaysa abuurida meel ay shaqaalaha iyo macaamisha dumarka ah ay la xiriiraan, tageero ka raadsadaan isla markaas saamayn ku yeeshaan fariimaha iyo tallaabooyinka badqabka.
  - Meeshii macquul ah, magacaw dhawr hogaan oo qaabilsan badqabka iskuna day in aad isku dhexqasto rag iyo dumar kala matalaya deegaamo kala duwan tusaale caasimadaha iyo meelaha banaanka ah
  - U magacaw hogaamada badqabka dadka deegaamada ama Local-ka ah Magacaabida iyo ka shaqaysiinta dadka ay soo sheegnay ee Booska hogaamada Badqabka waxa ay muujinaysaa in maamulka iyo madaxda sare ay si dhab ah uga hawlgaleen mawduuca Badqabka waliba marka laga hadlayo heerka Local-ka ah.

- La wadaag shaqaalaha oo dhan iyo macaamiisha in uu jiro nidaamka maaraynta badqabka, nidaamka hawlgalinta deegaamaysan (SOP) iyo waliba waxa ay tahay siyaasada IRC ee badqabka, hubi oo ogow cida ay tahay inay fariintan gudbiso adiga oo hubinaya inay haysato aaminaada iyo awooda ay ku gaarsiin lahayd cidii loogu talagalay.
  - Waxaa loo baahanyahay in shaqaalaha Local-ka ah rag iyo dumarba laga qayb galiyo marka ladiyaarinayo siyaasada badqabka iyo marka nidaamka hawlgalinta lala wadaagayo shaqaalaha kale iyo macaamiisha. Waa in ay ku jiraan dumarka shaqaale kooxeedyada ee CRRD Tan waxay ka tarjumaysaa in luuqadaha deegaanka iyo fahanka deegaanka la tixgaliyay

[2] Siyaasadahan badbaadinta macaamiisha waa: siyaasadda badqabka caruurta; iyo siyaasadda ka badbaadinta macaamiisha ka faa'ideysi galmo iyo gadoodfal

- Waxaa kale oo loo baahanyahay shaqaalaha deegaanka in la tixgaliyay kala duwanaanshadooda kaliya ma aha lab ama dhadig, lakiin, diinta, midabka iyo wax walba oo kala duwanaansho ah oo ka jira deegaanka taas waxay markaa ka tarjumaysaa matalaada kala duwanaanshada ee shaqaalaha IRC iyo meelaha ay ka shaqayso.

  - Waxaa lagu talinayaa in Borograamada socda iyo shaqaalaha Borogaramadaasba loo isticmaalo meesha u horaysa ee xiriirka lagala samaynayo Macaamiisheena
  - Waxaa lagu talinayaa in la isticmaalo luuqad fudud oo la fahmi karo marka la diyaarinayo nidaamka hawlgalinta deegaamaysan (SOP) si qoraalku uu noqdo mid la isticmaali karo iyada oo niyada lagu hayn karo in qofka diyaariyay tagi karo.
  - Ka raadso taageero kuwo u fara dhuudhuuban arimaha badqabka, sinaanta jinsiga iyo Unuga ka falcelinta iyo ka hortaga rabshadaha (VPRU) si isfahan iyo wada tashi loola sameeyo macaamiisha.

- Ogow noocyada wada xiriir iyo isfahan oo la isticmaali doono Waxaa jira wax badan oo lakala dooran karo oo ay ka mid-yiin, xiriir qof qof, Tabeele, idaacad, muuqaallo. waa un wax yar oo aan sheegnay
  - Waxaa loo baahanyahay in shaqaalaha iyo macaamiisha labadaba lagala tashado sidii ay jeclaan lahaayeen in ay kusoo gaaraan fariimaha badqabku. Caqabadaha Gudaha ah- tusaale ahaan isgaarsiin ama talephan la'aan ama in ay luuqada la isticmaalayaa tahay mid aan qornayn- waa in tixgalin goonni ah la siiyaa. Gudaha xaaladaheena kala duwan ma lahan hal jawaab oo sax sida fariimaha isugu gudbino, waxa ugu mihiimsanna ma ahan sida fariimaha loo gudbiyo laakiin waa sida loo helo.
  - Waxaa loo baahanyahay in da,da iyo jinsiga ay qeeb ka ahaadaan tixgelinta qaababka kala duwan ee wargaarsiinta, wadatashiga kooxaha qaaska ahna la qabto si loo xaqiijiyo in baahidooda ka muuqato qaabdka wada hadal ee la adeegsado.

> Xasuusnow: Caruurta iyo waayeelka aan waxba akhrin ma fahmi karaan tabeelle wax lagu qoray Waxaan u baahanahay inaan hal abuur yeelanno, isticmaalno sawiro, sawir gacmeedyo, muuqaallo iyo nooc walba oo aan ku gudbin karno fariinteenna

- Samee xusuusqoryo iyo isgaarsiino kusaabsan shaxda maareenta, hanaanka shaqada, iyo macluumaadyada kale ee la xiriira.
  - Waxaa lagu talinayaa in Hogaanka Badqabka, oo ay taageerayan xubnaha kale ee maamulka sare inay aasaasan qaab joogto oo dhamaan shaqaalaha looga la xiriiro badqabka macaamiisha. Tani waxay ku darsami kartaa mawdhuucyada wada hadalka shirarka maamulka sare ama kuwa shaqaalaha dhan, iyadoo dhinacyada kala duwan ee badqabka loo sii marinaayo tababarada 3bilba mar la qabto, ama mackuumad lagu diraayay xaifiiska Isku darka qaabab kala duwan ayaa inta badan noqoni kara wax tar
  - Waxaa lagu talinayaa in talo laga raadsado quburada ku xeeldheer badqabka, GE, iyo VPRU sida la rabo, kuwaas oo leh xirfado qaas oo taageeri kara horumarinta qalab wargaarsiin haboon hoolwadeenada badqabka, hoolwadeeno laga dhex abuuray IRC 2018di kana kobban hogaanka sare iyo shaqaalaha waaxyaha hay,dda

<u>Tababarka</u>

Halka wargaarsiinta ay tahay wax kusaabsan codka iyo habdhaqanka, tababarka waa siinta aqoon iyo xirfad ay si qoto dheer ugu fahmaan shaqaalaha, ay yihiin kuwa qaxootiga ah(hoose), kuwa joogtada aheen, qandaraaslayaasha, ama shaqaalaha maalin shaqeeya iyo ku bilaash a ku shaqeeya, Kuwa bahwadaagta la ah, ganacsatada, qaas ahaan, tani waxay non sheegeysaa sababta IRCda ay u aaminsataay in habdhaqanka qaar loo ogolyahay qof walboo la shaqeeya hay,adda - sida macaamiisha in loo dhaqmo si sharaf iyo qaddarin leh- iyo kuwo - sida inaan la ogoleen adeegsiga xamaalka caruurta ka hor istaagi waxbarashada

Tababarka waxuu ku saabsan yahay bixinta aqoonta iyo xirfadaha loo baahanyahay si u suurto-gasho haanaan falcelin markiiba ah, sharaf leh kuna saleesan dibababaha marka shaqsiyaal la kulmaan xadgudubyo badqab Qofna lagama filaayo inuu horey ka fahmo sida loogu jawaabayo dhibane Xafiisyada maxaliga ah qaarkood waxaa dhici kara in shaqaalaha loo tababaray mawluucan, la dhiganaayo kuwo qiimo leh, laakiin dhamaan saqaalaha waa loo tababaraa si ay u awoodaan inay u jawaabaan dhibane Ma garan karno qofka lagu aamini karo sırta dhibanaha, waana inan isudiryaarina isuna taagnaa taageernana dhibanayaasha kuwooda awoodda u leh Inay soo wargeliyaan

waxaa jira seddex heer oo tababaro ah oo loo baahanyahay in la bixiyo

1) Qof walbo waa inuu garanaayo sida looga falceliyo sirta dhibanaha bilowga hore
2) hogaanka iyo shaqaalaha badqabka waa loo tababaraa arimaha kore, lana siiyaa xirfad iyo aqoon ay kusameeyaan wacyigelin iyo shaqooyin beddelidda habdhaqanka ah; iyo
3) Kuwa kashaqeeya keesaska waa in loo tababaraa arimaha kore, lagu daray bixinta adeegsayada falcelinta yar

- Samee qorsho lagu xaqiijinaayo ishaqaalaha, oo ay jiraan kuwa hoose , kuwa aan joogtada aheen, qadaraaslayaasa, kuwa bilashka ku shaqeeya,ku bahwadaagta la ah, ganacsatada,iyo kusa kale Inay sifiican u fahmeen logona tababaray waxyabaha uu ka koobanyahay shaxda la tacaalidda iyo hanaanka shaqada, oo ay ka mid yihiin tababaridda joogtada ah si loo xaqiijiyo in dhamaan shaqsiyaadka ku xiran IRCda ay leeyahiin xasuusiyayaal iyo tababaro kusaabsan habdhaqanka la ogolyahay
    - Heer kusaman xarunta weyn ayaa waxaa laga shaqeeynayaa Suite balaaran oo tababaraada badqabka ah sidii looga dhaqangelin lahaa loogana fulin lahaa heer deegaan Waxuu ka koobnaan doonaa cutubyo barasho qadka iyo qlabka tababarka ee kuwa tababaro ku loo kuwaasoo loo sameeyay si tartiib-tartiib ah inay u dhisaan aqoonta iyo xirfadda shocodsiiyaana isbeddelka habdhaqanka waqti kadib Warbixin badan oo kusaabsan suitekan tababarka iyo horumarintiisa waxaa laga raadsan karaa madaxa sare badqabka Tababarada waxaa horumarinayaa loo qaabkii ay marxalad walbo ooga hadli lahaayeen,laakiin meeshii laga maarmaan ah waa turjumid iyo dhaqangelin loo maraa Markuu soo dhamaado,waxaa loo baahanyahay in tababarkan la siiyo dhamaan shaqaalaha goobaha dhamaantood
    - Waxaa lagu talinayaa, halkay macquul tahay, in maalgelin la codsado loo sii wado aqoon kordhinta - Sida aqoon kordhinta shaqaalaha oo joogto ah- iyo sidoo kale howlaha kale ee la xiriira badqabka iyo sharafta ee loog talgalay oo ay kamid yihiin lacago dhiirigelin ah, kuwa aan joogtada aheen,qadaraas, shaqaalaha maalintii shaqeeya, mutadawiciinta, shuraakada, ganacsatada iyo kuwa kala shaqeeya badqabka Hadda waxaa jiro caddeymo ah in qarashaadka lagu bixinaayo heer shakhsiyeed taas oo loogu talagalay hawlaha noocaas ee gaarka ah, iyo meeshii mashruuc ahaan looga maarmi waayo in si toos ah loogu xiro
    - Taageero Ka raadso khuburada ku xeeldheer badqabka, GE, iyo VPRU, hadba sidii loogu baahdo, si loogu diyaariyo looguna bixiyo aqabka tababarka

**SOO WARGELIN**

Macaamiisha IRC, suurtogalnimada ah in loo soo warbixiyo hay,adda qaab haboon, amaan ah, shaaraf leh, qarsoon, kuna saleesan badbaado ayaa muhiim u ah in la xaqiijiyo shalalka, markay dhacaan, in arko oo wax laga qabto. Jiritaanka iyo isticmaalka hanaanka warbixinta ayaa sidoo kale mustaqbalka fog noqon doona wax ka hortaga dambiilayaasha, maadaama uu gacan ka geysan doono abuuritaanka jawi furnaansho iyo isgaarsiineed.

Wadiiqooyinka warbixinta waxay ku kala duwanaan karaan marxaladda shaqo, xarumo badan oo warbixineed waa in laga dhigaa kuwo la laheli karo si loo xaqiijiyo inay yihiin xarumo ay isticmaali karaan macaamiisha ku kula duwan da,da iyo jinsiyadda. Waxa ugu dembayntii jira waa inay ahaadaan wax u wanaagsan dadka macaamiisha ah, waa inaysan noqon wax keliya

u shaqeenaayo hay,adda.[3] Meelaha ay barnaamijyada Badqabka Caruurta ee IRC, Ilaalinta iyo Awoodsiinta Haweenka (WPE) ama Ilaalinta iyo Xeerarka sharciga (PRoL) ay ka shaqeeyaan, warbixinta waxay noqon kartaa mid la dhiirageliyo, waxayna ku fuli karaan adeegyadan jira. meelaha aynan ka shaqeenin barnaamijyadan,ama meelaha ay dheeraad ku yihiin kuwan, in wadiiqooyin kale la abuuro ayaa loo baahan karaa. Haddii IRCda ka qeeb qaadaneeso qaababka cabashooyinka ee ka dhaxeeya hay,adaha, sida kuwa Ka Badbaadinta Macaamiisha Gadoodfalka iyo uga Faa,ideysiga Galmada (PSEA) , macaaniisha waxay sidoo kale si toos ah uga soo warbixin karaan marxaladaha ku xadgudubka iyo uga faa'ideysiga galmada iyagoo isticmaalaya qaababka noocaas ah.

- Sameey qaabab warbixineed oo u wanaagsan dadka Macaamiisha ah.
  - waxaa lagu talinayaa in aad qiimeen ku sameeyso dadka macaamiishaada ah si loo helo qaabka warbixineed ay doorbidayaan inay isticmaalaan si ay u soo gudbiyaan noocyada cabashada waafaqsan barnaamijka u degan IRC , xadgudubyada sharafta, ama xadgudubyada badqabka.
  - Xasuusnow in qaababka warbixinta ay qaadan karaan noocyo kala duwan oo ay xitaa ku kala duwanaan karaan xaaladda aad ku shaqeeyso: sida goobta, da'da, diinta, qabiilka, iyo jinsiga. luqadda iyo heerka akhris-qoraalka o hooseeyo waxay noqon kartaa arrin muhiim ah oo u baahan tixgelin marka la naqshadeynayo hababka warbixinta. Intaa waxaa dheer,shuruudaha war bixinta weey kala duwanaankaran hal wadan ama magaalo barnaamijka Qiimaynta waa in ay tixgeliso kala duwanashahan.

- Daji qorshe lagu faafinayo hababka warbixinta, iyo in lahubiyo jiritaanka qaababka warbixineed ay noqoto mid si joogta ah loogaarsiiyo dadk macaamiisha ah.
  - Waxaa loobaahanyahay in habka wargalinta in ladaabaco oo lafaafiyo iyadoo laga qaybgalinyo dadka macaamiisha ah. Tani waxay kacaawinaysaa ina lahubiyo inay jirto bilowga shaqadaba kalsooni aad usaraysa dhanka qaabka diyaarinta warbixinta, sidaas darteed dadaka macaamiisha ahan u aqoonsadaan nidaamku inuu yahay mid ay iyaga iska leeyeeihiin isticmaakiisa.
  - waxay ubahantay muuqaalo, maqal iyo fiidiyowyada( sida kuhaboon oo miisaaniyadu ogoshahay) isgaarsiinta kusaabsan sida macaamiishu ay usoo gudbin karaan warbixintooda waa qorantahay waana laheli karaa ayadoo u habaysan qaab ku haboon dhaqanka,luqada lagu qoray markaas, loona diyaariyay qaab muuqaal ah oo ay fahmi karaan caruurta iyo dadka qoraal aqriskoodu uu hooseeyo.
  - waydiiso waxii taakulayn ah kuwa khibrada uleh dhanka badqabka farsamada ee ilaalinta , GE, VPRU, iyo korjoogaynta qiimaynta iyo barashada(KQB) sida loobaahanyahay, , si loohubiyo in qaababka wargalinta ay lakulmaan dhaqamo wanaagsan iyo baahiyada dadwaynaha loo beegsaday.

- hormari nimaad kormeer oo kusaabsan adeegsiga nidaamka warbixinta iyo in lahubiyo inay kuhaboontahay baahida dadwaynaha macaamiisha ah.
  - Waxaa loobaahanyahay in lala yeesho kulan war celin joogta ah dadwaynaha macaamiisha ah si loosoo aruuriyo warbixinta oo loo tijaabiyo waxqabadka nidaamka war bixinta.
  - Waxaa lagu talabixyaa in korjoogaynta qiimaynta iyo barashada iyo iyo shaqaalaha barnaamijyada ay kaqayb qaataan korjoogtaynta mudada dheer ee iyo qaababka warbixinta , maadaama aya ayagu xiriir toos ah laleeyihiin macaamiisha. mas'uuliyada lagu maamulya iyo jiritaankeedaba waxaa dusha uga dhacaysaa oo iskaleh maamulka sare ee ilaa heer dagmo.

[3] Tilmaamo/tixraac dheeraad ah kusaabsan siyaabaha macaamiil usoo sheego waxaa laga heli karaa hogaamada habdhiska jawaab-celinta macaamiil ama ECU Qabyo qoraalka hadda ee qoraalka tixraaca,shax qoraaleedka, iyo hab-dhaqmada wanaagsan ee hadda jira waxaa laga heli karaa halkan https://rescue.box.com/s/645zwce8mr9xhenbqg0z1hky8cwhthvd

**DIYAARINTA WARBIXINTA IYO HABKA BAARITAANKA**

Inaad awood uleedahay inaad aruuriso warbixin adigoo ilaalinaya sirta iyo badbaadada qofka soosheegayo, iyadoo marwalba warbixinta udubdhexaad looga dhigayo muhimadana lasiinayo qofka dhibanaha ah, wa lama huraan haday IRC ay rabto inay abuurto jawi ay macaamiisha dareemaan xasilooni iyo amaan oo ay kusoo gudbin karaan wixii dhaqan xuma ah ee ay kala kulmaan shaqaalaha IRC. Waa muhiim in la qiro xaaladaha qaar meelaha ay kashaqayso IRC ay jiraan qatar aad u wayn oo xiriir laleh bulshada ama qoyska balaaran in laga warqabo in shaqsiga nugul uu leeyahay xad gudub badbaadin.

> Xusuuso: waxaa jiro waebixin waajib ahshuruudaha marka la ilaalinaayo xadgudubka kulug leh caruurta.

Warbixintu waa inay tixgalin siinayso duwanaansha jira ee dhanka dadka waawayn, dhalinyarada, iyo caruurta yaryar. Markay caruurtu soogudbinayaan warbixin, waxaa waajib ah in laysku dheeli tiro ilaalinta sirtrta warbixintooda iyo talaabada laqaadanyo ayna noqto talaabadaas mid marwaba siinaya muhimada ugu wayn danaha ilmaha. Ilmaha wa inuu marwalba lasocdo daryeele/mas'uul[4]inta lagu gudojiro warbixinta iyo shaqada baaritaanka. Su'aalaha lawaydiinayo caruurta waa inay noqodaan kuwa aad looga fiirsaday, si aynan ukeenin dhibaato dheeraad ah. CRRD,da haday dhamaan suurto gal tahay, waa in lagu soodaraa shaqaalaha farsamada dhanka badbaadada ilmaha markay socoto shaqada su'aalaha caruurta,waana inuu sida ugu haboon ugatalabixiyaa amaba uu kaqaybqaato markii su'aalaha la waydiinyo. Marka loofiiriyo RAI, tani waxay ubaahan kartaa adeegsiga khayraadka dibada ah.

Marka warbixin lasamaynayo, shaqaalaha IRC waa inay raadsadaan macluumaadka soosocdo: waxa dhacay; goorta iyo meesha uu falku kadhacay; iyo cidda kuluglaheed. Marna lama aqbalikaro in dadka warbixinta soo gudbinaya ee soo cabanaya inlayiraahdo been bay sheegayaan ama warbixintoodu way soo been abuurteen. Markaad helno warbixin, waxaan waydiinaa su'aalaha saxda ah ee ay udub dhexeed utahay danaha dhibana, waa in larumaysataa cabashada uu soo gudbinayo dhibanaha, kadibna la'wadaag warbixinta ECU si loobaaro.

Ogolaashada[5]iyo ilaalinta sirta [6]waa qodobo lagama maarmaan u ah sharafta iyo daryeelka aan siino dhibanayaasha usoo gudbiya cabashadooda warbixineed IRC, waana qasab in loohogaansanaado waqti kasto. IRC waxy adaygsanaysaa habraaca kusalaysan wax walboo laqabanyo in udub dhaxaad u noqdo tixgalinta danaha dhibanaha. ka tilmaan qaado *talooyinka ay dajisay IRC ee kusaabsan in wax walboo laqabanyo in udub dhexaad looga dhigo danaha dhibanaha si loosoo gudbiyo warbixinta wixii anshax xumada kadhalatay badqabka dhibanaha* waxii faahfaahin dheeraad ah.

Xaaladaha qaar hadii midkamid ah shaqaalaha lagusoo eedeeyay xadgudub IRC, IRC waxay kusoo wargalinkartaa ayadoo ay kaashanayso hay'addaha uu xiriirku kadhexeeyo ama ciidamada dagmada ee amniga gacanta ku haya si maraa talaabo laqaado ama baaritaan dheeraad ah lasameynayo. Tixraacyada noocaan ookala ah ayaa laqadariyaa marka

[4] Daryeele waa erey-bixinta loo adeegsado in lagu qeexo ruuxa maalin kasta ka shaqeeya daryeelka ilmaha Isaga ama iyada waa waalid,qaraabo,saaxib qoos ama qofkale oo ilmaha mas'uul ka ah; muhiim ma ahan ku lug lahaansho masuuliyad sharci

[5] Dhanka IRC , ogolaasho waxaa lagu qeexaa sida ogolaansho shaqsiyadeed oon khasab ahayn kasoo leh awoodda sharci oo uu ku bxini ogolaasho Si loo bixiyo ogolaasho warqab leh shaqsiga waa inuu leeyayahay awood iyo qaangaarnimo uu ku ogaado waxa kusaabsan uunna fahmo adeegyada la bixinaayo iyo inay sharci ahaan awoodi karaan inay ogolaashahooda bixiyaan Si loo xaqiijiyo in ogolaashahu yahay “mid warqab leh” , adeeg bixiyayaasha waa inay dhibanaha siiyaan aqbaarta soo socota: dhamaan aqbaarta macaquulka ah iyo kala doorashooyinka uu qofka heli karo si uu markaa isaga/ayada u awoodo inuu kalaxulasho sameeyo, u sheeg qofka inuu ayada/isaga baahan karo aqbaartiisa/aqbaarteeda kuwo kale kuwaasoo siini karo adeegyo dheeraad ah, waxa dhici doona inta aad ayada/asaga wada shaqeeyneesaan; halista iyo faa,idooyinka adeegga; inuu ayada/asaga xaq u leeyahay inuu diido ama uu diido qeeb kasta oo adeegyada ah; iyo xaddidaadyada ilaalinta sirta

[6] IRC gudaheeda, ilaalinta sirta waxaa lagu qeexaa sida Mabda anshax ah kasoo la xiriira xirfadda adeegga caafimaadka iyo bulshada in lajoogteeyo kalsoonida iyo ilaalinta sirta waxay u baahantahay in adeeg bixiyayaasha ay ilaaliyaan dhamaan warbixinta macaamiisha ee lasoo uruuriyay ayna ogolaadan inay la wadaagi karaan keeska macaamiisha markii lahelo ogolaashahooda cad oo kali ah. Dhamaan warbixinta qoran waxaa lagu xafidaa meel sir ah oo ku xiran feylal waxaana lagu dul-qoraa feylasha keeska warbixino aan cadaynaynin qofka faylka iska leh. joogtaynta kolsoonida iyo ilaalinta sirta micnaheeda waa inay adeeg bixiyayaasha aynan kala hadlin faahfaahinta keeska, qoos ama saaxib, saaxib shaqo kasoo aqoontiisa waxyeelada loo arko waxaan muhiim eheen Waxaa jira xuduud u'go'an ilaalinta sirta marka lala shaqeenaayo caruur

shaqsiyaadkan(dhibanayaasha, shaqaalaha, iyo marqaatiyaalka)aynan lakulmayn wax naftooda halis ku ah ama dhaawaci kara.

- Laxiriir dhamaan shaqaalaha IRC, kuwa gunada kushaqeeya, kuwa aan joogtada aan ahyn, qandaraas kuwa ku shaqeeya ama shaqaalaha maalinlaha ah ,kuwa kushaqeeya iskaa wax u qabso kuwa bahwadaagta la'ah hay'ada kale, dadka baayacmushtarka ah iyo bahwdaagta kale si loohelo lona diyaariyo warbixin ama loo kala xulan lahaa dhacdooyinaka looga badbaadinayo dhibana waxii xadgudub ah.
    - Waxaa loobaahanyahay si loodiyaariyo warbixino wa inaad lafalgasho isgaarsiinta iyo qaybta tababarka si IRC ay waxkaqabato dhanka badbaadinta ilaa heer deegaan,taasoo ay dhaqan galisay ilaa heer deegaan.
    - Xasuusnoow qaabka warbxinta waa inay waafasaqntahay *habraaca qorista warbinta ee u dajisan aduunka* iyo *talabxinta IRC ee habka looqorayo warbxinta laga qorayo dadka badbaadinta kashaqeeya taasoo marwalba udubdhexaad looga dhigayo dana dhibana* . Habraaca dheeraadka ah kuna saabasan sida loo aqbalayo warbixinada iyo sida loo qoroyaba markay ku wa uxilsaaran badbaadinta ay gaystaan xadgudubyo kadhan ah caruurtao kusaabsan badbaadinta xadgudubka caruurta waxaa laga heli karaa lifaaqa 2aad ee qaabka maaraynta.
    - Raadi taageero khabiiro dhanka farsamada uguna takhasusay sida ugu saraysa dhanka badbaadinta, baarista, GE, and VPRU, dhamaan warbixnaha macaamiisha in udubdhexaad looga dhigay markii laqorayay baahida iyo danaha dhibanaha.

- Diyaari nidaamka maaraynta warbxinaha si loohubiyo in dhamaan codsiyada kooxda baaritaanka iyo in lala xiriiro kuwa lagu soo ee deeyay xadgudubka,dhibanayaasha, iyo deeqbixiyayaasha,dhamaan in sifiican oo taxadar uu kujiro iyo kalasiin mudnaan ba in arintooda waxlooga qabtay.
    - Waxaa laga maarmaan ah in mas'uuliyada wadaxiriirinta iyo isgaarsiinta in horay uu usiidajiyay maamulka sare, lana dhaqan galiyo iyadoo lagu salaynayo baahida markaa taagan iyo duruufta jirta iyo baahiyaha qofka, sida baahida uuqabo qofka dhibanaha ah.
    - Waxaa loobaahanyahay falanqaynta sharciyada udajisan heerdeegaan iyo siday xiiriir ula leeyihiin habka dacwadgudbinta iyo isla xisaabtanka dhanka xadgudubyada dhowrka waji leh ee kusalaysan galmada sidii go'aan looga sii gaaro xadgudubyada markaana xililgii kuhaboonaa loosoo saaro talabixino ay udubdhaxaad u yihiin danaha iyo baahida dhibanaha.
    - Waxaa lagu talinayaa in lahelo badbaadin heer deegaan ah inay ka qaybqaadanayso qayblibaax qaabka wadaxiriirka iyo dabagalkaba.

**KAFALCELIN IYO TAAGEERIDDA ADEEGBIXINTA**

Marka uu dhaco xadgudubyo rabshada wato , IRC waxay ubaahantahay in xafiisyada looqalabeeyo si ay ubixiyaan adeegyo tayo leh,tixgalina siinaya kaladuwanaanshaha jinsi iyo da'da , iyo in daryeel caafimaad oo laguhelikaro 72 saacadood gudahooda,[7]iyada oo ay waheliso bixinta inta ugu yar oogu yar sida hoos lagu qeexay.

Xafiisyada CRRD ee leg xarumo caafimaad, ama barnaamijyada hay'adaha Badbaadinta caruurta iyo/ama WPE, hay'adahaas waa inay noqdaan kuwa hogaaminaya ilaalinta tayada uu leeyahay adeega labixinayo, ayadoo lawaafajinaayo habraaca ugu wanaagsan iyo iskudabaridka uguheerka sareeya. Tan waxay ka koobnaan doontaa afar qaybood aadna ubaaxad wayn oo kala ah: amniga; caafimaadka; cilmi-nafsiga iyo bulshada; iyo meelaha qaarkood, adeegyada sharciga. Heerarka oogu hooseeyo ee adeegyadaan, samaynta qaabab gudbin oo muuqda, iyo sidii aan ugaarsiinlahayn adeegyadaan waxaa lagu faahfaahinayaa lifaaqa 3aad.

[7] Kahor 72 saacadood ayaa ah waqtiga ugu haboon, xaaladaha qaarkoodna, oo ay RAI, kujirto waxa suura gal ah in laheli karo adeegyada dagdaga ah

Waxaa mhuhiim ah in halkaan laga ogaado in bixinta adegyada taageerada ah loobaahan doononxaalad kasto oo ilaalin gaar ah magacaabista Hay'da badbaadinta caruurta ama shaqaale kiis WPE ah, kuwaas oo hubin doono in dhibanuhu uu helo adeegyo taageero dagdag ah hadabo hadba sida looogu baahdo. Halka doorarka noocaas ah aysan kajirin, IRC waxaa kuwaajib ah inay hubiso in qaabab kale oo lagu raadsanaayo adeegyada taageerada iyo wadiiqooyin gudbineed oo si cad asaasay, oo waafaqsan heerarkeena ooguhooseeyo, ayaa shaqeeynaya.

RAI helitaanka taageerada heer deegaan ahaan waxay gudbinta kadhigi kartaa wax fudud si tixgelin leh Sikastabo hanoqotee, waxaa muhiim ah in adeegyada ay muujiyaan heerarka oogu hooseeya ee ku xusan lifaaaqa 3aad, kuwaasoo markii la sameeyay in uu si gaar ah uga hadlo dol-doloolyada adeegga ee inta badan barnaamijyadeena CRRD ee wadanka, asaas u noqdaa heer cad oo waafaqsan dhaqamada wanaagsan. Xitaa gudaha RAI, wali waxaan ubaahanay amnigaas; caafimaad; tiiranyo-bixin; iyo , xaaldaha qaarkood, in adeegyada sharciyeed laga dhigo wax laheli karo, wadiiqooyin gudbineed oo cadna dhaqso loo asaaso

- Samee dulmar guud ama qorshe muujinaayo adeegyada munaasab ah inay yihiin ama laheli karaayo kahor inta xad gudub badbaad uusan dhicin.
    - Waxaa looga baahanyahay in qalabka qariiradaynta degdega ee adeega ee RC's CRRD ama qalab qariiradayn lamid ahin la isticmaali doonaa. Marka ay jiraan isbadelo xaaladda howlgalka, qiimaynta adeegyada wa in dib loosameeyaa si loohubiyo in adeegyada ay yihiin wax lahelikaro marka dhibanayaasha iyo kuwa taageera ay ubaahdan inay helaan.
    - Loogu talagalay CRRD
        - Waxaa loobaahanyahay in meesha aysan ka jirin adeegyada IRC ee badqabka caruurta, caafimaadka ama adeega WPE, oo aysana jirin adeegyo dibadeed oo kufilan una kudhow ama aan tayo kufilan lahayn, qorshooyin ayaa loo sameeyaa si khuburo looga keeno gudaha iyo waliba/ama si looxoojiyo awooda adeega bixiyayaasha dibada
        - Waxaa loobaahanyahay in shaqaalaha kiiska ay yihiin kuwo horay loosoo -magacaabay si ay ula shaqaynayaan dhibanayaasha xadgudubyada badqabka; kuwaani waaxy noqon karaan shaqaalaha badqabka carrurta ilamaha ama shaqaalaha WPE, shaqaalaha kale ee IRC halka aysa lahayn barnaamijka badqabka caruurta iyo WPE, ama adeeg bixiyayaal dibad Haday noqoto shaqaalaha kale ee IRC ama adeeg bixiyayaasha dibadeed, waxay ubaahan doonaan in lasiiyo tababr kuhaboon.
        - Waxaaa lagu taliyaa, halkay suurta gal tahay, in wadiiqooyinka gudbinta ay sidookale kujirto aqbaarta kusaabsan hoolwadeeno aan xiriir la laheen IRC, hadaiii dhacado uu dhibane soo oogay dacwad ka dhan IRC uusan kuqancsanayn helitaanka adeegyada hay,adda Wan in loo daayaa dhibanayaasha inay go'aaansadaan hay'adda ama adeegyada jira ee ay ayagu aad oogu kalsoonaan karaan inay kahelaan taageerada.
    - Loogu talagalay RAI
        - Nooc ahaan tani waxay lug ku yeelaan doonto adeegyada dibada. Halka uu jiri karo male-awaal in adeegyada kajiro mareykanka ay noqon karaan tayo kufilan oo dabooli karto baahiyadeena, wali waxaa muhiim ah in la muujiyo waxyabaha sida luuqadaha ay bixiyaan adeegyada iyo inay leeyahiin qibrad ay kula macaamilaan qaxootiga ku jiro tiiraanyo
    - Waxaa lagu talinayaa in xafiisyada maxaliga ah ay hubiyaan shaqaalaha IRC, shaqaalaha aan rasmiga aheen, kuwa gunada ku shaqeeya, qandaraas, ama shaqaalaha maalinta, kuwa iskaa kushaqeeya in sidoo kale marin loo siiyo noocyada kala duwan oo adeegyada taageerada ah hadii ay helleen warbixin kusaabsan xadgudub badqabka, ama hadii ay taageereen kuwa ay saameeyeen xadgudubyo badqabeed

- Karaadso taageero xaga caafimaadka, badqabka caruurta, iyo/ama lataliyayaasha ku xeeldheer WPE si ay u hagaan caddeynta iyo aasaasidda adeegyada jawaab celineed

**BARASHADA IYO HABKA MUUJINTA**

Kadib markii dhamaan lasoosheego xadgudubyada badqabka, waa hanaan wax barasho la sameeyo si loo haleelo casharada iyo dol-doloolaha harsan. Tani waxay noqon kartaa lagana yaabo in ay ku lug yeelato xaaladeen dheeraad ah jawaab bixinteena , ama muujinta qaabkeena kudhisan dhibahnaha Waxa kalo oo kujiri karo talooyin kasoobaxay baaritaanka baraha ECU Meesha amni ah in sidaas layeelo, ra,yiga dadka macaamiisha ah ee kusaabsan sida IRC ay jawaab sifican ugu bixin karto xadudubyada badqabka waa in la aruuriyaa.

Qorshaha ficilcelinta waa in loo abuuraa si kusaleysan aqbaarta lasoo uruuriyay loona hergaliyaa si wax looga qabto arimaha la caddeyay Wax kabarashada qaladaadka , xitaa hadii ay yihiin kuwo aan bareer aheen, waa qayb muhiim ah oo lagu hagaajiyo urur ahaan.

- U Samee qorsho joogto ah casharadii laga bartay iyo hanaan dib umilicsi kadib markii lasoo sheegay lana soobaaray ku xadgub badqab
  - Waxaa lagu taliyaa in uu hogaamiyo hanaanka noocan ah maamulka sare. Tani waa inay kujiraan howlwadeenada badqabka
  - Waxaa lagu taliyaya in jawaabaha laga helo shaqaalaha xeeldheera yaasha ah ee deegaanka iyo macaamiisha lagu soodaro hanaanka waxbarashada iyo dib u milicsiga.
  - Waxaa lagu taliyay in maamulka sare ay sameeyaan nidaamyo ay kuhubinayaaan tan in ay tahay hanaan macno leh.

# Liiska hubinta

**KAHORTAGA IYO Diyaargarowga**

- Xafiis kasto oo maxali ah wuxuu hubiyaa in ugu yaraan labo xubnood oo kamid ah maamulka sare loo magacaabo inay noqdaan howlwadeenada badqabka.
- Shaqaalaha IRC, kuwa gunada ku shaqeeya,kuwa joogtada aheen, qandaraasleyda, ama shaqaalaha yowmiyan u shaqeeya, kuwa iskaa ku shaqeeya, bahwaadaagta, ganacsada, iyo la kale ee xiriira waa inay fahan buuxo u leeyahiin sharuucda hab dhaqanka iyo waliba nidaamka heerarka howlgalka (SOP) oo kudhisan deegaanka
- Macaamisha IRC - dadka-waawayn iyo caruurta- waxay fahan dhamaystiran u leeyahiin sharuucda hab dhaqanka munaasabka ah iyo nidaamka heerarka howlgalka (SOP) la deegaameyay, lagu dhisay xaladdooda loona turjumay heerka aqoontooda iyo fahankooda
- Maamulka sare wuxuu si joogta ah ula xiriiraa shaqaalaha wax kusaabsan jiritaanka iyo waxa u kakoobanyahay nidaamka heerarka howlgalka (SOP), sharuucda hab dhaqanka munaasabka ah.
- Shaqaalaha IRC, kuwa gunada ku shaqeeya,kuwa joogtada aheen, qandaraasleyda, ama shaqaalaha yowmiyan u shaqeeya, iyo kuwa iskaa ku shaqeeya,inay mariin u helaan oo ayna helaan tababaro tafatiran oo joogto kuna kusaabsan badqabka.

**SOO SHEEGISTA**

- Qiimaynta dada macaamiisha ah waxaa loo sameeyaa si loo haleelo qaababka loo doorbidi karo soo wargelinta nooc kasto oo cabasho ah ayadoo la tixgelinaayo qaabdhismeedka barnaamijyada IRC, xad gudubyada sharafka, ama xadgudubyada badqabka
- Hanaayada soo wargelinta/sheegidda hadda jiro waa la xoojinayaa iyadoo loo sii maraayo barnaamijyada badqabka kuwa cusuban oo soo wargelinta/sheegidda ahna waa la sameeynayaa waxaana loo dar-dargelinayaa si waafaqsan kala duwaanaashaha baahiyooyinka lagu ogaaday qiimaynta dadka macaamiisha
- Muuqaal, maqal, iyo fiidiyow(kuhaboon miisaaniyaduna ogoshahay) war-gaarsiinta kusaabsan sida macaamiisha usoo warbixin/shegi karaan ayaa si diyaarsan loo heli karaa oo micna ahaana ah wax dhaqan kuhaboon .
- Shirar jawaab celineed oo joogtada ah ayaa lala yeelanyaadadka macaamiisha ah si loosoo uruuriyo warbixinada loona tijaabiyo wax tarka nidaamka soo wargelinta/sheegidda.

**Habra kordhinta SOO SHEEggida IYO BAARITAANKA**

- haqaalaha IRC, kuwa gunada ku shaqeeya,kuwa joogtada aheen, qandaraasleyda, ama shaqaalaha yowmiyan u shaqeeya, iyo kuwa iskaa ku shaqeeya, bahwadaagta, ganacsatada, iyo kuwa kale way ogyihiin sida loosookordhiyo shilalka lasoo sheegay ama la soo la soo xushay ee ah xadgudubka kadhanka ah macaamish, sida kuxusan*tilmaamaha warbixinta Caalamka* .
- Micnayaasha dareen Celinta dhibanaha ay u leedahay waa la fahmaa lagu dheggaa Tan waxaa kijiro soogudbinta qasabka ah ee sheegashada kasta ah oo kulugleh caruurta.
- Sibuuxdo ula shaqee dhamaan codsiyada baarista samaeysay, sida oogu fiican ee awoodda kooxda maxaliga ah, oo ay kujirto warbixinada dambiilaha adeysan iyo dhibanaha kusaabsan natiijada baaritaanka iyo ficilada laqaadi doono.
- la aggaasin kalana xiriir deeq-bixiyayaasaha, sida ogu haboon, baaritaanada iyo ficiladii loo qaadayo jawaab celinta warbixinada xadgudubyada badqabka.
- xafiisyada maxaliga ah waa inay lahaadaan nadaamka maaraynta iyo sharuucda badqabka macluumaadka la hay

**JAWAAB CELINTA IYO ADEEGYADA TAAGEERADA**

